

Waad ku mahadsantahay inaad nagu soo biiro si aan
kaaga la hadalno adeegyada soo kabashada kala guurka!
Waxaan kulanka bilaabi doonaa daqiiqado yar gudahood.



Washington Office of Superintendent of
PUBLIC INSTRUCTION

Ikhtiyaarrada Ka Qaybgalka Kulankan

- Kulankaan waa la duubi doonaa waxaana lagu daabici doonaa [Websaytka Office of Superintendent of Public Education \(OSPI\) ee HALKAN](#).
- Linkiga boggan ayaa lagu dari doonaa sheekaysiga inta lagu jiro kulanka.
- Adeegso badhanka Q&A si aad u weydiiso su'aal ama aad uga faallooto su'aasha.
- Waxaa nagala soo qayb galayo turjumaan luuqada Isbaanishka, Francisco Rojas
- Qoraal toos ah ayaa sidoo kale la heli karaa; taabo badhanka "CC":

cc

Live Transcript



Washington Office of Superintendent of
PUBLIC INSTRUCTION

Kulanka Macluumaadka Qoysaska: Adeegyada Soo kabsashada Kala Guurka



Tania May
Maamulaha Waxbarashada
Khaaska ah
tania.may@k12.wa.us



Alexandra Toney
Kormeeraha Barnaamijka
alexandra.toney@k12.wa.us



Washington Office of Superintendent of
PUBLIC INSTRUCTION

Maajo 26, 2021

Kulanka macluumaadka maanta waxaa loogu talagalay in lagu siiyo qoysaska macluumaad ku saabsan adeegyada ka soo kabashada kala guurka. Magacaygu waa... waxaana igu soo daray.... Wuxaan sidoo kale aad ugu faraxsanahay inaan yeelano dhowr iskaashato oo kala guur ah oo maanta nagu soo biiraya Qaybta Dhaqancelinta Xirfadaha (Division of Vocational Rehabilitation, DVR), Maamulka Naafonimada dhanka Koritaanka (Developmental Disabilities Administration, DDA), Xarunta Isbeddelka ee Adeegyada Kala Guurka, iyo wadashaqaynta ka qaybgalka qoyska. Rajadeenu waxay tahay in iskaashatooyinkani ay gacan ka geysan karaan wadaagista fikradaha, su'aalaha, iyo macluumaadka markaan sii soconno fiidkan. Marka, aan bilowno!

Aqoonsiga Dhulka



**Qoraal u dir 855-917-5263 si
aad u ogaato dhulalka
Qabaa'ilka ee aad hadda
degan tahay**



Washington Office of Superintendent of
PUBLIC INSTRUCTION

4

Kuweena matalaysa Xafiiska Kormeeraha Guud ee Waxbarashada Dadweynaha (Office of Superintendent of Public Instruction, OSPI) waxay si xushmad leh u qirayaan in hay'adani dawladeed ay ku taalo dhulalka soo jireenka ah ee loo yaqaan Squaxin Island Nation, oo ah faracii dadka badaha ee ku noolaa kuna barwaqoobay xeebta Bada Salish. Wuxaan u samaynay aqoonsigan inaanu u furno meel ictiraaf ah, ka mid noqosho, iyo xushmeynta iskaashatooyinkeena qabaa'ilka maamuleed iyo dhammaan ardayda asaliga ah, qoysaska, iyo shaqaalaha guud ahaan bulshadeena. Wuxaan boggan ku soo darnay lambar si aad farriin ugu soo dirto si loo aqoonsado dhulalka qabiileed ee aad hadda ku sugaran tahay.


**Waxaan qireynaa xanuunka iyo naxdinta bilihi la soo dhaafay iyo
in ka badan 400 sano ee cunsuriyadda Mareykanka.**

**Waxaan garab taaganahay bulshadayada midabka leh. Waxaan
sido kale qireynaa isdhexgalka kuwa aqoonsada inay yihiin dad
midab leh iyo shaqsiyaad naafo ah.**

**Waxaan ballanqaadeynaa inaan udub dhexaad u nahay
shaqadeena si aan baabi'ino cunsuriyad nidaamsan iyo
carqaladeynta dhismayaasha kartida leh.**



Washington Office of Superintendent of
PUBLIC INSTRUCTION



Bayaanka Sinnaanta

Arday, qoys, iyo bulsho kasta waxay leeyihii xoog iyo aqoon dhaqameed oo uga faa'iideeya dhiggooda, barayaashooda, iyo dugsiyadooda.

Xaqijintaa sinaanta waxbarashada:

- Waxay ka gudubtaa sinnaanta; waxay u baahantahay hogaamiyaasha waxbarashada inay baaraan siyaabaha siyaasadaha iyo dhaqamada hada socda ay ugu dhacaan natijjooyin kala duwan ee ardaydaydeena midabka leh, ardayda saboolnimada ku nool, ardayda qaata waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada Qofka Baranaya Ingiriisiga, ardayda loo aqoonsado inay yihiin LGBTQ+, iyo bulshooyinka ardayda aadka u guurta.
- Hogaanka waxbarashada waxa uu u baahan yahay samaynta fahanka macluumaadka taariikhiga ah; wada shaqaynta ardayda, qoysaska iyo wakiilida bulshada ee gaadhida go'aanka; iyo in si firfircoon loo baabi'yo cabqadaha qaabaysan, lagu badalo xeerar iyo nidaamyada lagu xaqijinayo dhamaan ardayda ee helitaanka tilmaamaha iyo taageerada ay u baahan yihiin inay ka guul gaaraan dugsiyadeena.



Washington Office of Superintendent of
PUBLIC INSTRUCTION

Abuuritaanka Dooda Maanta

- ❖ Waaan qireynaa dadaalka, caqabadaha iyo guulaha barayaasha, ardayda, iyo qoysaska inta lagu jiray cudurka safmarka ee COVID.
- ❖ Adeegyada soo kabashada iyo adeegyada ka soo kabashada kala guurka waa mawduucyo badan oo su'aalo ah oo ka yimaada qoysaska iyo degmooyinka isla markaana aasaas u ah cabashooyinka badan ee gobolka iyo dhagaysi sharchiyeedyada.
- ❖ Soo jeedintan waxaa loola jeedaa inuu ahaado mid dhameystiran oo dabiici ah, macluumaadka, istaraatiiyadaha, iyo tusaalooyinka aan wadaagi doono looguma talagalin inay ka dhigan tahay degmooyinku inay yihiin kuwo aan ka warqabin ama aan horey u horumarinaynin/ hirgelinaynin qorshooyinka wax looga qabanayo baahiyaha ardayda.
- ❖ Fadlan xor u ahaw inaad weydiiso su'aalo, laakiin taxaddar ku saabsan wadaagista macluumaadka u gaarka ah ardayda, maadaama tan la duubi doono oo si guud loo faafin doono.



Washington Office of Superintendent of
PUBLIC INSTRUCTION

7

Waxaan jeelaan lahaa inaan ku furo doodda maanta qaar ka mid ah qaabaynta. Si aan u bilowno, waxaan qireynaa dadaalka, caqabadaha, iyo guulaha barayaashayada, ardaydeena, iyo qoysaska inta lagu jiray cudurka safmarka ee COVID. Adeegyada soo kabashada iyo adeegyada soo kabsashada kala guurka, gaar ahaan, waxay ahaayeen mawduucyo isdaba joog ah oo su'aalo naga waydiyaan qoysaska iyo dugsiyada. Waxay sidoo kale saldhig u ahaayeen cabashooyin badan oo gobolka ah iyo dhagaysi sharchiyeedyada. Soo jeedinta caawa waxaa loola jeedaa inay ahaato mid dhameystiran oo dabiici ah, taasoo la micno ah macluumaadka, xeeladaha, iyo tusaalaha aan wadaagno waxaa loola jeedaa inaan bixinno aragtii guud. Ula ma jeedno in aan tusno in degmooyinku aysan ka warqabin ama aysan horay u sii wadin oo aysan u hirgelin qorshayaal wax looga qabanayo baahiyaha ardayda.

Waxaan dib u eegnay dhammaan su'aalaha lagu soo gudbiyay nidaamka diiwaangelinta waxaanna ku soo darnay dhammaan bogagga. Waan ku soo dhaweyneynaa in su'aalo na weydiiso, laakiin taxaddar ka muuji wadaagista macluumaadka u gaarka ah ardayda, maadaama tan la duubayo oo si guud loogu soo qori doono websaydkeena. Su'aalaha gaarka ah ee ku saabsan Barnaamijka Waxbarashada Gaarka ah (Individualized Education Program, IEP) ardayga ama adeegyada ayaa laga yaabaa inay si fiican uga wada hadlaan iyada oo loo marayo iimayl ama wicitaan taleefan oo shaqsi ah. Waaan

la wadaagi doonaa macluumaadka xiriirka xafiiskeena.

Yoolalkayaga Doodda Maanta

- ❖ Inaan hubino in qoysasku ogadaan waxa adeegyada soo kabashada iyo adeegyada soo kabashada kala guurka ay yihiiin.
- ❖ Inaan cadayno sida adeegyada kabashada kala guurka ah ay u go'aamiyaan, u diiwaangeliyaan, ayna u siiyaan kooxda Barnaamijka Waxbarashada Gaarka ah (Individualized Education Program, IEP), oo ay ku jiraan kooxaha ardayda.
- ❖ Inaan wadaagno waxa qoysaska ka filan karaan iskuulada iyo kooxaha IEP, oo ay ku jiraan waqtiga.
- ❖ Ka wada hadlno doorka OSPI ee bixinta hagista joogtada ah iyo kormeerka adeegyada soo kabashada iyo adeegyada ka soo kabashada kala guurka ah.



Washington Office of Superintendent of
PUBLIC INSTRUCTION

8

Mid ka mid ah su'aalaha aan helnay, ayaa wax laga weydiiyay dadaalka aan ugu jirno inaan qoysaska ula wadaagno macluumaadka ku saabsan adeegyada ka soo kabashada xilliga kala guurka. Hadafyadeena kulankaan waa inaan hubino qoysaska inay wax ka ogadaan adeegyada soo kabashada iyo adeegyada soo kabashada kala guurka, si loo caddeeyo sida kooxaha IEP ay u go'aaminayaan, u diiwaangelinayaan, una bixinayaan adeegyada soo kabashada kala guurka iyo kooxaha ardayda, ay wadaagaan waxa qoysaska ka filan karaan inay sameystaan iskuullada iyo kooxaha IEP oo ay ku jiraan jadwalka waqtiyada, iyo ka wada hadalka doorka OSPI ee bixinta hagida joogtada ah iyo kormeerka adeegyada soo kabashada kala guurka.

Jadwalka Jidkeena:

- Guudmarka Adeegyada Soo Kabsashada
- Adeegyada Soo kabsashada Kala Guurka (nooc ka mid ah adeegyada dib soo kabashada waxbarashada gaarka ah)
- Waqtiga iyo Adeegyada
- Su'aalaha & Tallaabooyinka Xiga



Washington Office of Superintendent of
PUBLIC INSTRUCTION

9

Kahor intaanan ka wada hadal adeegyada soo kabashada kala guurka, waxaan jeclaan lahayn inaan ku bilowno dulmar guud oo ku saabsan adeegyada soo kabashada. Wuxaan sidoo kale ka hadli doonaa waqtiyada iyo adeegyada loogu talagalay adeegyada soo kabashada xilliga kala guurka. Wuxaan wax ka qaban doonaa su'aalaha inta lagu jiro kulanka, oo waxaan ku soo xiri doonaa aqoonsashada qaar ka mid ah tallaabooyinka xiga.

Maxay Yihiiin Qorshayaasha Soo Kabashada Caafimaadka & Tacliinta Degmada?



**Kooxaha IEP sidoo kale waxay sameyn
doonaan go'aan oo ku saabsan
Adeegyada Soo kabashada.**



**Qorshayaasha Soo kabashada
Caafimaadka & Tacliinta Ardayda waxay
wax ka qabtaan baahiyaha guud ee
ardayda ee ka dhashay xirnaanshaha
dhismaha iyo COVID-19.**

[Qorshaha Soo Kabashada Caafimaadka iyo Tacliinta Ardayga OSPI: Tilmaamaha Qorsheynta 2021](#)

[Tubta Washington ee Adeegyada Soo Kabashada Waxbarashada Gaarka ah: 2021 & Wixii
Ka Dambeeyaa](#)

10

- Kahor intaan u guda galin hanuuninteen maanta, waxaan doonayay inaan si kooban u aqoonsado in go'aanada ardayga ee IEP ee ku saabsan adeegyada ka soo kabashada ee Qorshayaasha Soo kabashada ee degmooyinku soo gudbin doonaan sannadkan.
- Boggan waaan rajeynayaa inuu leeyahay qaab waxtar leh si loo fahmo sida dukumiintiyada hagidda adeegyada dib u soo kabashada ee ku xiran qaybta hoose ay isku mid yihiin oo ayna kala duwan yihiin
 - Qorshayaasha Soo Kabashada Caafimaadka iyo Tacliinta Ardayga waxaa laga doonayaa OSPI bisha Juun.
 - Waxay aqoonsan doonaan qiimaynta gaarka ah ee heerka fasalka si loo aqoonsado farqiga xagga barashada/caafimaadka ardayda oo dhan. Qorshayaashani waxay tilmaamayaan guud ahaan soo kabashada ardayda inay taageerto sidii wax looga qaban lahaa saameynta cudurka; oo ay ku jiraan waxbarid dheeri ah, taageero ladnaan, iyo fursado manhajka ka baxsan oo loogu talagalay ardayda oo dhan.
 - Wuxaad ka arki kartaa astaamaha dhismaha halkan maaddaama kuwan loogu talagalay inay ka faa'iideystaan dhammaan ardayda.
 - Ka dib waxaa sidoo kale lagu dhejin doonaa taas, kooxaha IEP gaarida go'aano gaar u ah ardayda oo ku saabsan haddii ardaygu u baahan yahay adeegyada soo kabashada kuwanina waa adeegyo dheeri ah oo wax looga qabanayo la'aanta horumarka ku habboon ee yoolalka IEP sababo la xiriira adeegyada la seegay ama xaddidan ama sababo kale awgood oo ka dhashay cudurka safmarka.



Washington Office of Superintendent of
PUBLIC INSTRUCTION

- Marka si kooban loo soo koobo ka hor inta aynaan u gudbin bogga xiga: go'aamada loo sameeyay ardayda oo dhan iyo ardayda gaarka ah iyo kuwan way midoobaynaa si taageero loo siiyo ardayda u qalma waxbarashada gaarka ah.

Waa maxay Adeegyada Soo kabsashada?

- ❖ Adeegyada Soo kabashada ayaa ah adeegyo dheeri ah oo wax looga qabanayo la'aanta horumar ku habboon ee yoolalka waxbarashada shaqsiga ah ee IEP sababo la xiriira adeegyo la seegay ama xaddidan ama sababo kale oo ka dhashay cudurka safmarka.
(Waxay la mid tahay Waxbarashada Magdhawga.)
- ❖ Kooxaha IEP waxay u baahan doonaan inay yeeshaan wada hadal ku saabsan adeegyada soo kabashada inta lagu jiro kulamada kooxda IEP sanadka soo socda (ugu yaraan).
- ❖ Adeegyada soo kabashada waxaa loogu talagalay ardayda Xanaanada ka hor illaa da'da 21 (yo laga yaabee da' ka sii dambaysa, oo loogu talagalay ardayda 21 sano jirsatay inta lagu gudajiray ama kadib 2019–20 welina aan helin diblooma).



Washington Office of Superintendent of
PUBLIC INSTRUCTION

11

Maanta waxaan ka hadli doonaa go'aannada kooxda IEP ee ku saabsan adeegyada soo kabashada iyo inaan si kooban u siino Hanuuninta Soo kabashada Waxbarashada Gaarka ah ee 2021 iyo Wixii Ka Dambeeyaa ... oo si gaar ah ugula hadlaysa adeegyada ka soo kabashada kala guurka qaybta dambe ee kulanka.

Marka, waa maxay Adeegyada Soo kabsashada?

Waa adeegyo dheeri ah oo wax looga qabanayo la'aanta horumarka ku habboon ee yoolalka waxbarashada shaqsiga ah sababo la xiriira adeegyo xaddidan ama sababo kale oo ka dhashay cudurka safmarka ah.

Kuwani waxay la mid yihiin waxbarashada magdhowga ah ee ah inay wax ka qabanayaan farqiga u dhxeeyaa horumarka ama adeegyadii hore, si kastaba ha noqotee adeegyada soo kabashada waxaa loogu talagalay inay noqdaan waxqabad, jawaab wada shaqeyn koox IEP ah halkii ay ka dhalan lahayd khilaaf.


Degmooyinku waxay u yeelan doonaan wadahadallada adeeggan soo kabashada ah dhammaan ardayda leh IEP PreK-21 iyo laga yaabee da' ka sii dambaysa haddii ardaygu 21 jirsado inta lagu jiro cudurka safmarka oo uusan weli helin diblooma.

Ardayda qaarkood go'aannadan waxay awoodi karaan inay sugaan illaa dib u eegiddooda sannadlaha ah ee IEP iyo ardayda qaarkood ee leh baahiyoo degdeg ah wadahadalkan wuxuu u

baahan karaa inuu si dhakhso leh u dhaco.

Aan u gudubno bogga xiga waxaanna horay ugu sii dheeraan doonaa hagitaankeena.

Waa Maxay Ahmiyadaha Adeegyada Soo Kabashada?



Washington Office of Superintendent of
PUBLIC INSTRUCTION

Xigashada: [Washington's Roadmap for Special Education Recovery Services: 2021 & Beyond](#) (p. 2).

12

Sawirkan wuxuu ka yimid dukumiintiga hagitaankeena ee ku saabsan adeegyada soo kabashada waxaana laga heli karaa bogga 2. Ahmiyadeenna adeegyada soo kabashada waxaa ka mid ah wax ka qabashada sinnaanta, ka mid noqoshada, iyo shuruudaha waxbarashada gaarka ah; degdeg buuxinta baahiyaha ardayda iyo la socodka horumarka; oo ay ku jiraan ardayda iyo qoysaska iskaashato ahaan, oo ay ku jiraan wadahadal hufan iyo bixinta taageero luqadeed.

Waa Maxay Ahmiyadaha Adeegyada Soo Kabashada?

- ❖ U khaas ah kooxda IEP, ma ahan saacad-saacad ama daqiqad-daqiqad laakiin waa inaysan ku saleysneyn qaacido ama xisaab.
- ❖ Horumarka waxaa lagu cabiraa iyadoo lagu saleynayo Qorshaha Kala Guurka iyo IEP ka hor COVID, oo aan aheyn Qorshooyinka Waxbarashada Sii Socota (Continuous Learning Plans, CLP) iyo/ama adeegyo xadidan oo ku meel gaar ah inta lagu jiro cudurka safmarka ah.
- ❖ Qoysaska iyo ardayda waa qeyb ka mid ah kooxda IEP waxayna yihii iskaashatooyin muhiim u ah go'aaminta baahiyaha/qaddarka/jadwalka adeegyada soo kabashada.
- ❖ Degmooyinku waa inay bixiyaan helitaanka luqadda, tarjumaadda, iyo tarjumaad qoraal ah, haddii loo baahdo, si loo hubiyo ka qaybgalka waalidka.



Xigashada: [Washington's Roadmap for Special Education Recovery Services: 2021 & Beyond](#) (p. 2, 4).

13

Dhisida mudnaantaas, waxaan rabnaa inaan ku nuuxnuuxsanno in go'aannada ku saabsan adeegyada soo kabashada iyo adeegyada ka soo kabashada kala guurka ay noqdaan kuwo si shaqsieed loogu qoondeeyo arday kasta ayna go'aamiyaan kooxda IEP. Lama filayo in adeegyada dib soo kabashadu ay noqdaan daqiqad-daqiqad ama saacad-saacad wixii adeegyo la seegay ah, laakiin go'aanka sidoo kale MA AHA in lagu saleeyo qaacido ama xisaab. Ma fileynayno in dhammaan ardayda dhigata iskuulku ay helaan qaddar isku mid ah oo dhanka adeegyada soo kabashada.

Xogta la socodka horumarka ayaa muhiim u ah inay ka caawiso kooxaha IEP inay go'aan ka gaaraan adeegyada soo kabashada. Kooxuhu waa inay tixgeliyaan horumarka ardayga ee ku saleysan IEP ka hor COVID iyo Qorshaha Kala Guurka, ma ahan Qorshaha Waxbarashada Sii Socota (CLP) ama adeegyo ku meel gaar ah ama xaddidan oo la bixiyo inta lagu jiro cudurka safmarka. Wuxaan rabaa in aan cadeeyo in qiimeynta iyo IEP-yada la sameeyay 18kii bilood ee la soo dhaafay ay sidoo kale yihii ilo macluumaad oo muhiim ah waana in loo tixgeliyaa inay qeyb ka yihii go'aanka. Qoysaska iyo ardayda waa in lagu daraa habka go'aan qaadashada oo ay helaan helitaanka taageerada luuqada.

Waa maxay Nidaamka Adeegyada Soo kabashada?

- ❖ Adeegyada Soo kabashada waa in loo tixgeliyaar arday kasta oo leh IEP: muxuu ahaa heerka horumarka laga filayey ee IEP ka hor COVID haddii UUSAN cudurka dilaacin?
- ❖ Qoysasku maahan inay codsadaan nidaamkan; waa inay ka mid noqdaan hawsha IEP. Degmooyinka sidoo kale waa inay ahaadaan kuwo ka jawaabaya codsiyada waalidka oo aysan dib u dhigin wada hadaladaan.
- ❖ Waqtiga waa in mudnaanta la siyyaa iyadoo lagu saleynayo baahida shaqsiyeed. Degmooyinka ayaan laga fileynin inay si deg deg ah ugu qabtaan IEP ga arday walba WAANA inaysan dib u dhigin go'aamada aan loo baahnayn.

Xigashada: [Washington's Roadmap for Special Education Recovery Services: 2021 & Beyond](#) (p. 1).



Washington Office of Superintendent of
PUBLIC INSTRUCTION

14

Marka, aan u gudubno sida hawshu u egtahay iyo waxa qoysaska ka filan karaan dugsiyada. Filashada OSPI ayaa ah in adeegyada ka soo kabashada loo tixgeliyo arday kasta oo leh IEP. Tan waxaa ka mid ah adeegyada ka soo kabashada kala guurka ee loogu talagalay ardayda da'da kala guurka jirta, oo aan qoddobo dheeri ah ku dari doonno daqiqiyo yar gudahood. Si loo go'aamiyo baahida adeegyada soo kabashada, kooxda IEP waa inay dib u eegis ku sameeyaan heerka horumarka laga filayo ardayga, laga soo bilaabo COVID illaa iyo hadda. Muxuu ahaa heerka horumarka ardayga laga filayo ee ku saabsan yoolalka IEP haddii cudurka UUSAN dilaacin, maxayse tahay horumarka ardaygu hadda ku sugaran yahay? Farqi kasta oo u dhaxeeya labadaas tallaabo waa waxa adeegyada soo kabashada ay tahay inay wax ka qabtaan.

Tani waa inay ka mid noqtaa nidaamka IEP ee loogu talagalay ardayda oo dhan, qoysaskuna waa inaysan ku qasbanayn inay codsadaan in tan ay dhacdo. Degmooyinka sidoo kale waa inay ahaadaan kuwo ka jawaabaya codsiyada waalidka oo aysan dib u dhigin wadahadallada. Waaan sidoo kale qireynaa in kulon kasta aan la qaban karin isku mar. Waqtiga iyo nidaamka waa in mudnaan la siyyaa iyadoo ku saleysan baahida shaqsiyeed ee ardayga. In kasta oo degmooyinka aan laga fileynin inay si degdeg ah ugu qabtaan IEP ga arday kasta, haddana waa inaysan dib u dhigin go'aannada ku saabsan adeegyada soo kabashada.

Waxay Dugsiyadu Qabanayaan Hadda?

Xagaaga 2021

- Waxay qorsheynaya oo aruurinayaan xogta horumarka si loo go'aamiyo adeegyada guud ee soo kabashada degmada.
- Waxay midaynayaan ama isku hagaajinayaadeegyada ka soo kabashada barnaamijyada xagaaga; bixiyaa marka lagu daro Sanad Dugsiyedka La Kordhiyay (Extended School Year, ESY).
- Tixgeli tababarka kooxda IEP u baahan tahay si loo gaaro go'aannada adeegyada ka soo kabashada.
- Jadwalaynta iyo qabashada qaar ka mid ah* shirarka IEP.
- Bixinta adeegyo soo kabasho sida loogu baahan yahay ardayda leh IEP.

Dayrta 2021 & Guga 2022

- Ururinta/dabagalka saamaynta adeegyada iyo barnaamijyada soo kabashada xagaaga 2021.
- Jadwalaynta iyo qabashada qaar ka mid ah shirarka IEP. Go'aaminta baahiyaha adeegyada soo kabashada inta lagu jiro kulammada IEP.
- Midaynta ama iswaafajinta adeegyada ka soo kabashada ee guud ahaan barnaamijyada kaabista/soo kabashada.
- Bixinta adeegyo soo kabasho sida loogu baahan yahay ardayda leh IEP.



Washington Office of Superintendent of
PUBLIC INSTRUCTION

15

Dhowr su'aalood oo aan ka helnay qoysaska waxay ku saabsanaayeen qorshayaasha socda iyo dalabyada loogu talagalay adeegyada soo kabashada, gaar ahaan xilliga xagaaga. Labada bog ee soo socda, waxaan ku wadaagi dooncaa fikirkayaga ku saabsan jadwalka. Marka la gaaro xagaaga 2021, waxaan fileynaa kooxaha IEP inay qorsheynayaan oo ay uruuriyayaan xogta horumarka si loo go'aamiyo, ugu yaraan, adeegyada soo kabashada ee degmada oo dhan. Alexandra ayaa maanta lagu furay isbarbardhiga heerarka degmo ee Qorshayaasha Soo Kabashada Caafimaadka & Tacliinta – qorshayaashaas waxaa ka mid noqon kara taageero dheeri ah oo loogu talagalay dhammaan ardayda, oo ay ku jiraan taageero la beegsanayo ee loogu talagalay ardayda naafada ah ee ku nool degmada. Degmooyinka qaar ayaa laga yaabaa inay ka bilaabanayaan noocyada barnaamijyadaas, iyagoo qorsheynaya inay sii wadaan go'aamada shaqsiyadeed iyo taageerada laga bilaabo deyrta 2021. Wuxaan ku dhiirigalineynaa degmooyinku inay isku daraan oo/ama isku waafajiyaan adeegyada soo kabashada ee ardayda leh IEP oo sidoo kale leh barnaamijyo kale oo xagaaga ah, markay habboon tahay. Wuxa kale oo macno samayn karta in la bixiyo adeegyo soo kabasho ah, oo ay ku jiraan adeegyada ka soo kabashada kala guurka, marka lagu daro taageerada Sannad Dugsiyedka La Kordhiyay (ama ESY). In kasta oo helitaanka shaqaaluhu xadidan yahay inta lagu jiro xagaaga, waxaa jiri kara xaalado marka loo baahan yahay in la qabto kulanka IEP. Sidii loogu baahdo, adeegyada soo kabashada waa in loo fidiyaa ardayda leh IEP.

Markay u gudubto dayrta 2021 iyo guga 2022, hawshani way sii socon doontaa. Cudurka ma dilaacin xilliga xagaa, sidaa darteed macno ayey leedahay in adeegyada soo kabashada ay u baahan karaan in intaas laga sii dheereeyo. Kooxaha IEP waa inay aruriyaan, oo ay la socdaan horumarka saameynta adeegyada soo kabashada iyo barnaamijyada la bixiyo xagaaga. Kooxda ayaa go'aamin

doonta baahida joogtada ah ee adeegyada soo kabashada inta lagu jiro kulamada IEP. Adeegyada waa in la isku daraa oo la waafajiyaa barnaamijyada guud ee soo kabashada, markay habboon tahay, iyo ardayda leh IEP ay tahay inay helaan adeegyada soo kabashada shaqsiyed sida loogu baahdo.

Waxay Dugsiyada Samayn Doonaan Marka Xigta?

Xagaaga 2022

- Dib u eegista saameynta barnaamijyada iyo adeegyada soo kabashada dayrta 2021 iyo guga 2022.
- Jadwalaynta iyo qabashada qaar ka mid ah* shirarka IEP.
- Aqoonsiga haddii loo baahan yahay adeegyo soo kabasho oo dheeri ah.
- Bixinta adeegyo soo kabasho sida loogu baahdo, marka lagu daro ESY ama barnaamijyada kale ee xagaaga.

Dayta 2022 & Guga 2023

- Ururinta/dabagalka saamaynta adeegyada iyo barnaamijyada soo kabashada xagaaga 2022.
- Kala hadlida wixii adeegyo soo kabasho ah ee sii socda inta lagu jiro kulammada IEP.
- Aqoonsiga haddii loo baahan yahay adeegyo soo kabasho oo dheeri ah.
- Bixinta adeegyo soo kabasho sida loogu baahdo, oo lagu daro barnaamijyo kale oo dheeri ah.

Xagaaga 2023

- Dib u eegista saameynta barnaamijyada iyo adeegyada soo kabashada dayrta 2022 iyo guga 2023.
- Jadwalaynta iyo qabashada qaar ka mid ah* shirarka IEP.
- Aqoonsiga haddii loo baahan yahay adeegyo soo kabasho oo dheeri ah.
- Bixinta adeegyo soo kabasho sida loogu baahdo, marka lagu daro ESY ama barnaamijyada kale ee xagaaga.



Washington Office of Superintendent of
PUBLIC INSTRUCTION

16

Ardayda qaar ee la soo kulmay saameyn weyn iyo la'aanta horumar ku habboon yoolalka IEP muddadii cudurka safmarka, howshan waxaa laga yaabaa inay u baahato inay socoto xagaaga 2021, sanad dugsiyedka soo socda, iyo xitaa xagaaga 2023. Hawshu way sii socon doontaa waana in lagu ogeysiyo xogta horumarka, iyadoo dib loo cabirayo heerka horumarka la filayo laga soo bilaabo waqtiga ka horreeya COVID.

Shaxda Qulqulka Go'aanka Adeegyada Soo Kabashada

	Heerarka Jira	Horumar	Adeegyada
COVID Ka Hor (Kadka)	Maxay ahaayeen heerarka waxqabadka ardayga ee jiray kahor COVID?	Muxuu ahaa heerka horumarka ardaygu (ee yoolalka IEP) kahor COVID?	Waa maxay waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira ee laga diwaangeliyey barnaamijka IEP-ga ardayga ee COVID ka hor?
Laga bilaabo Xilliga Guga 2020 illaa Hadda	Maxay walaacyo ka muujiyeen waalidiinta? Waa maxay farqiga u dhaxeeya heerarka waxqabadka hada ee ardayga, marka la bardhigoo heerka waxqabadka ee laga fili lahaa ardayga haddii uusan cudurku dilaacin?	Illaa heer intee la eg ayaa heerka ardayga ee horumarka (ee yoolalka IEP) uu hoos u dhacay ama gaabis ku yimid marka loo eego heerarka asasiga ah?	Waa maxay waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira ee la siiyay ardayga Guga 2020 iyo inta lagu guda jiray sanad dugsiyeedka 2020–21 marka loo bardhigoo bixinta xadka ah ee Waxbarashada Dadweynaha oo Biloash ah oo Habboon (Free Appropriate Public Education, FAPE)? Heer intee la eg ayuu ardaygu ka helay adeegyadii la bixiyay guga 2020 iyo inta lagu jiro sanad dugsiyeedka 2020–21?
Go'aanka Adeegyada Soo Kabashada	Sidee iyo goorma ayuu ardaygu heli doonaa adeegyada soo kabashada? Maxay yihiin ikhtyaarada la heli karo ee loogu talagalay helitaanka loo dhan yahay, haddii adeegyada soo kabashada la bixiyo inta lagu jiro ama ka baxsan maalinta dugsiga?	Iyada oo ku saleysan heerka horumarka ardayga ee hadda, da da, iyo heerka koritaankiisa, waa maxay jadwalka loogu talagalay ardaygu inuu ku gaaro heerka laga filayo horumarka ee meelaha adeegyada kabashada ee la tilmaamay? Sidee iyo intee jeer ayaa waalidiinta lagu wargalin doonaa horumarka laga gaarayo adeegyada soo kabashada, oo ay ku jirto sida kooxda IEP ay wax uga qaban doonan la'aanta horumar macquul ah?	Iyada oo ku saleysan heerarka hadda ee waxqabadka ardayga iyo adeegyada la seegay ama la dhimay inta lagu jiro xilliga cufurka safmarka ah, waa maxay waxbarashada gaarka ah ama meelaha adeegga la xiriira ama yoolalka IEP ee u baahan adeegyada soo kabashada? Meelaha adeegyada soo kabashada ee la tilmaamay, xaddiga adeeg ee loo baahan yahay si looga caawiyoo ardayga inuu gaaro heerka horumarka laga filayo haddii uusan cudurku dhicin?

Xigashada: [Washington's Roadmap for Special Education Recovery Services: 2021 & Beyond](#) (p. 5).

17

Jadwalkan waxaa sidoo kale si toos ah looga la soo baxay hagitaanadeena adeegyada soo kabashada. Linkiga wuxuu ku jiraa boggan, waxaadna ka heli kartaa jadwalka bogga 5 ee dukumintiga hagista. Waxaan dhowrka bog ee soo socda ku sheegi doonaa tusmooyinka.

Shaxda Qulqulka Go'aanka Adeegyada Soo Kabashada

	Heerarka Jira	Horumar	Adeegyada
COVID Ka Hor (Xadka)	<i>Maxay ahaayeen heerarka waxqabadka ardayga ee jiray kahor COVID?</i>	<i>Muxuu ahaa heerka horumarka ardaygu (ee yoolalka IEP) kahor COVID?</i>	<i>Waa maxay waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira ee laga diwaangeliyey barnaamijka IEP-ga ardayga ee COVID ka hor?</i>

Xigashada: [Washington's Roadmap for Special Education Recovery Services: 2021 & Beyond](#) (p. 5).

18

Tallaabada ugu horreysa ee lagu ogaanayo baahida adeegyada soo kabashada, oo ay ku jiraan adeegyada ka soo kabashada kala guurka, waa in dib loo jaleeco heerkala waxqabadka ee ardayga ee jiray ka hor COVID. Kooxuhu sidoo kale waa inay tixgeliyaan heerkala ardayga ama heerkala horumarka ee yoolalka IEP ee ka hor COVID. Ugu dambeyntiina, waa maxay waxbarashadda gaarka ah iyo adeegyada la xiriira ee laga diwaangeliyey barnaamijka IEP-ga ardayga ee ka hor COVID?

Shaxda Qulqulka Go'aanka Adeegyada Soo Kabashada

	Heerarka Jira	Horumar	Adeegyada
Laga bilaabo Xilliga Guga 2020 illaa Hadda	<p>Maxay walaacyo ka muujiyeen waalidiinta?</p> <p>Waa maxay farqiga u dhaxeeya heerarka waxqabadka hada ee ardayga, marka la barbardhigo heerka waxqabadka ee laga fili lahaa ardayga haddii uusan cudurku dilaacin?</p>	<p>Illa heer intee la eg ayaa heerka ardayga ee horumarka (ee yoolalka IEP) uu hoos u dhacay ama gaabis ku yimid marka loo eego heerarka aasaasiga ah?</p>	<p>Waa maxay waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira ee la siiyay ardayga Guga 2020 iyo inta lagu guda jiray sanad dugsiyedka 2020–21 marka loo barbardhigo bixinta xadka ah ee FAPE?</p> <p>Heer intee la eg ayuu ardaygu ka helay adeegyadii la bixiyay guga 2020 iyo inta lagu jiro sanad dugsiyedka 2020–21?</p>

Xigashada: [Washington's Roadmap for Special Education Recovery Services: 2021 & Beyond](#) (p. 5).

19

Marka horay loogu sii socdo waqtiga hadda jira, waa maxay welwelka ay ka muujiyeen waalidka iyo ardaygu? Waa maxay kala duwanaanshaha (ama farqiga) udhaxeeya heerarka haatan ee ardayga, marka la barbardhigo waxqabadka ee laga fili lahaa ardayga haddii uusan cudurku dilaacin Tusaale ahaan, haddii IEP-ga ka hor COVID uu lahaa ujeedo kala guur oo la xiriirta shaqada, sidee buu ardaygu ugu sii socday himiladaas ka hor COVID? Waa maxay heerka horumarka aad ka filan laheyd hadafkaas haddii COVID uusan dilaacin? Sidee ardaygu ku sameynaya yoolkaas maanta, oo ku saleysan xogta horumarka? Heerka ardaygu (ama heerkisa) ama horumarkiisu miyuu gaabiyay hadda marka loo barbardhigo ka hor COVID? Maxay yihiin adeegyada la soo bandhigay iyo adeegyad ee u ardaygu ka heli karay inta cudurku socday? Dhammaan macluumaadkaas waxay ka caawin doonaan kooxda IEP inay go'aan ka gaaraan baahida adeegyada soo kabashada.

Shaxda Qulqulka Go'aanka Adeegyada Soo Kabashada

Heerarka Jira	Horumar	Adeegyada	
Go'aanka Adeegyada a Soo Kabashada	<p>Sidee iyo goorma ayuu ardaygu heli doonaa adeegyada soo kabashada? Maxay yihiin ikhtiyaarada la heli karo ee loogu talagalay helitaanka loo dhan yahay, haddii adeegyada soo kabashada la bixiyo inta lagu jiro ama ka baxsan maalinta dugsiga?</p>	<p>Lyada oo ku saleysan heerka horumarka ardayga ee hadda, da'da, iyo heerka koritaankiisa, waa maxay jadwalka loogu talagalay ardaygu inuu ku gaaro heerka laga filayo horumarka ee meelaha adeegyada kabashada ee la tilmaamay?</p> <p>Sidee iyo intee jeer ayaa waalidiinta lagu wargalin doonaa horumarka laga gaarayo adeegyada soo kabashada, oo ay ku jirto sida kooxda IEP ay wax uga qaban doonaan la'aanta horumar macquul ah?</p>	<p>Lyada oo ku saleysan heerarka hadda ee waxqabodka ardayga iyo adeegyada la seegay ama la dhimay inta lagu jiro xilliga cufurka safmarka ah, waa maxay waxbarashada gaarka ah ama meelaha adeegga la xiriira ama yoolalka IEP ee u baahan adeegyada soo kabashada?</p> <p>Meelaha adeegyada soo kabashada ee la tilmaamay, xaddiga adeeg ee loo baahan yahay si looga caawiyo ardayga inuu gaaro heerka horumarka laga filayo haddii uusan cudurku dhicin?</p>

Xigashada: [Washington's Roadmap for Special Education Recovery Services: 2021 & Beyond](#) (p. 5)

20

Kooxda IEP ayaa go'aamin doonta yoolalka IEP iyo meelaha adeegyada loogu talagalay adeegyada soo kabashada, oo ay ku jiraan adeegyada ka soo kabashada kala guurka. Waqtiga, qadarka, iyo nooca howlaha soo kabashada way u kala duwanaan doonaan arday kasta, iyadoo ku xiran xaddiga horumarka loo baahan yahay in la sameeyo iyo meelaha himiloo yinka IEP.



Adeegyada Soo kabashada Kala guurka ah ee loogu talagalay Ardayga leh IEP

(Qeybta Adeegyada Soo kabashada)

Marka hadda, aan u gudubno adeegyada soo kabashada kala guurka. kuwaas oo ah qayb ka mid ah ardayda soo kabashada.

Waa Maxay Adeegyada Soo kabsashada Kala Guurka?

- ❖ Adeegyada soo kabashada kala guurka waa adeegyo kala guur oo dheeraad ah oo loogu talagalay ardayda leh IEP si wax looga qabto la'aanta horumar macquul ah oo ku saabsan yoolalka IEP ama qorshaha kala guurka sababta oo ah maqnaanshaha ama xaddidan waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira, ama sababo kale oo ka dhalatay cudurka safmarka.
- ❖ Maalgelinta adeegyada soo kabashada kala guurka waxaa ka mid ah maaliyadaha waxbarashada gaarka ah ee federaalka iyo gobolka, maalgelinta Heerka Samatabixinta Mareykanka (American Rescue Plan Act, ARPA), iyo lacagta gobolka ee loogu talagalay adeegyada kala guurka gobolka ee la dheereeyay ee loogu talagalay ardayda ka weyn da'da 21.



Washington Office of Superintendent of
PUBLIC INSTRUCTION

22

Waxaan rajeynayaa in qeybtii hore ee kulankeena maanta ay gacan ka gaysteen inay ku siiyan dareen wanaagsan oo ku saabsan adeegyada soo kabashada. Adeegyada soo kabashada kala guurka aad ayej isugu eg yihiin – waa adeegyo kala guur oo dheeri ah oo wax looga qabanayo la'aanta horumar macquul ah oo ku saabsan yoolalka IEP iyo/ama kala guurka ka dhashay cudurka safmarka ah.

Waxyabaha ay tahay in la xuso ayaa ah inay jiraan lacago kala duwan oo loo heli karo si looga taageero dugsiyada bixinta adeegyada soo kabashada ee kala guurka. Meelaha laga maalgeliyo waxaa ka mid ah maaliyadaha waxbarashada gaarka ah ee federaalka iyo gobolka, Lacagta Qorshaha Samatabixinta Mareykanka (ama ARPA), iyo lacagaha gobolka ee gaarka ah ee loogu talagalay adeegyada kala guurka ee la kordhiyay ee loogu talagalay ardayda ka weyn da'da 21. Maalgalintaas waxaa ka mid ah \$12M oo loogu talagalay sanad dugsiyeedka 2021–22, iyo \$12M oo loogu talagalay sanad dugsiyeedka 2022–23.

Alex ayaa halkan soo galaya wuxuuna naga caawinayaa inaan helno maclumaad dheeraad ah oo ku saabsan adeegyada soo kabashada kala guurka.

Ardaygaygu Ma U Qalmaa Adeegyada Soo Kabashada Kala guurka?

- ❖ Ardayda da'da kala guurka jirta (guud ahaan da'doodu u dhaxayso 16 illaa 21) waxaa laga yaabaa inay soo mareen carqaladeyn dhanka waxbarashada ku saleysan shaqada iyo marin u helidda bulshada xilligan.
- ❖ Ardayda da'doodu u buuxsantay 21 sano inta lagu guda jiray 2019–20 ama 2020–21 ee aan wali gaadan diblooma sidoo kale waxay ubaahan karaan adeegyada soo kabashada kala guur ah.
- ❖ Adeegyada soo kabsashada kala guurka waa in uu:
 - Wax ka qabtaa la'aanta horumar macquul ah oo ku saabsan yoolalka IEP ama Qorshaha Kala Guurka ee IEP.
 - Wax ka qabtaa waxbarashada gaarka ah ama adeegyada la xiriira ee la seegay ama xaddidan.
 - Taageeraa ardayda si ay u gaaraan heerarka laga filayo horumarka ee ku wajahan himilooyinkooda dugsiga sare ka dib (sida lagu muujiyey Qorshaha Kala Guurka ee IEP iyo Qorshaha Dugsiga Sare iyo Wixii ka dambeeyaa).



23

Marka, su'aalaha soo socda ee aad isweydiin karto ayaa ah haddii ardaygaagu u qalmo adeegyadan soo kabashada kala guurka. Arday badan oo ka mid ah da'da kala guurka ee 16-21 ayaa laga yaabaa inay la kulmaan carqaladeyn dhanka waxbarashada ku saleysan shaqada iyo marin u helidda bulshada inta lagu guda jiro xilliga cudurka safmarka waxaana laga yaabaa inay u qalmaan adeegyada soo kabashada kala guurka. Ardayda da'doodu u buuxsantay 21 sano inta lagu gudajiray xilliga cudurka safmarka ee aan wali qaadan diblooma sidoo kale waxay ubaahan karaan adeegyada kala guurka.

Adeegyadan haddii loo go'aamiyo sida loogu baahan yahay kooxda IEP waxay:

- Wax ka qaban kartaa horumar la'aanta hadafyada IEP ama Qorshaha kala guurka ee IEP.
- Bixin kartaa waxbarasho gaar ah oo la seegay ama adeegyo la xiriira WAXAYNA sidoo kale
- Taageeri karaan ardayda si ay ugu noqdaan heerarka laga filayo horumarka ee ku aaddan himilooyinkooda dugsiga sare ka dib (sida lagu muujiyey Qorshaha Kala guurka IEP iyo Qorshaha Dugsiga Sare iyo Wixii Ka dambeeyaa [High School and Beyond Plan, HSBP]).

Dhowr qodob oo aan doonayo inaan ku tilmaamo halkan ayaa ah kooxda IEP ayaa mas'uul ka ah go'aaminta goorta ardaygu buuxiyo shuruudaha qalin jabintooda oo aan ku koobnayn kaliya dhibcaha iyo dariiqa qalinjabinta laakiin sidoo kale qorshahooda kala guurka IEP iyo himilooyinka IEP. Marka ardaygu kasbado dibloomahooda, sababtoo ah kooxda IEP waxay go'aamiyeen inay buuxiyeen dhammaan shuruudaha qalinjabinta iyo inaan loo baahnay adeegyo waxbarasho gaar ah oo dheeri ah, oo ay ku jiraan adeegyada soo kabashada kala guurka. Kooxaha IEP waa inaysan soo saarin diblooma oo ay dib u dhigaan si ardaygu u helo adeegyada soo kabashada kala guurka.

Qodob kale oo halkan ku yaal ayaa ah: Waayeelka sii wadaya inuu helo adeegyada soo kabashada kala guurka ama ka qaybgalka barnaamijka kala guurka ayaa la socon kara asaaggooda kana qaybgeli kara dhammaan howlaha qalinjabinta. Ardaydani waxay heli karaan shahaadada xaadiritaanka inta lagu jiro xafadda qalinjabinta ka dibna waxay heli doonaan dibloomahooda markay dhammaystiraan dhammaan shuruudaha qalinjabintooda, kooxda IEP-na waxay go'aamisay in aan loo baahnay adeegyo waxbarasho

gaar ah oo dheeri ah. Sharciga Kevin ([RCW 28A.155.170](#)) wuxuu u oggolaanayaa ardayda sii wadi doonta helitaanka adeegyada waxbarashada gaarka ah ee u dhexeeya da'da 18 iyo 21 inay ka qeybqaataan xafladda qalinqabinta iyo nashaadaadka asxaabtooda kadib afar sano oo dugsi sare dhigasho ah oo ayna helaan shahaadada imaanshaha.

Maxay Dugsiyadu u Qabanayaan Soo kabashada Kala guurka?

- ❖ Adeegyada soo kabashada kala guurka waxaa loo tixgeliyaar arday kasta oo da' kala guur kira oo leh IEP: muxuu ahay heerka horumarka laga filayey ee IEP ka hor COVID iyo Qorshaha Kala gurrka haddii UUSAN cudurka dilaacin?
- ❖ Qoysaska iyo ardyadu maahan inay codsadaan nidaamkan inuu dhaco; waa inay noqotaa qayb ka mid ah nidaamka IEP.
- ❖ IEP waxaa dib u eegis lagu sameeyaa ugu yaraan sanadkiiba mar waxaana dib u eegis lagu sameeyn karaa in ka badan iyada oo aan la helin horumarka himilada IEP, macluumaadka waalidiinta, iyo/ama in laga wada hadlo baahiyaha la filayo ee ardayga.



Washington Office of Superintendent of
PUBLIC INSTRUCTION

24

Adeegyada Soo kabashada kala guurka sida dhammaan go'aannada soo kabashada waa in dib loo eego oo loo tixgeliyaar arday kasta oo leh IEP. Adeegyada Soo kabashada kala guurka waxay gaar u noqon doonaan ardaydaas da'da kala guurka jirta, 16 illaa 21 iyo ka weyn

Go'aammada IEP ee Adeegyada Soo kabashada waxay ku saleysnaan doonaan heerka laga filayo horumarka IEP ka hor COVID iyo qorshaha Kala guurku siduu ahaan lahaa haddii uusan cudurka dilaacin. Qoysaska iyo ardaydu maahan inay codsadaan in nidaamkan uu dhaco, waa inuu qayb ka ahaadaa nidaamka IEP. Nidaamka IEP waxaa ku jira ugu yaraan dib u eegis IEP sanadle ah laakiin waxaa laga yaabaa inay ka badnaato iyadoo ku saleysan baahida ardayga, horumarka himilada IEP ama macluumaadka waalidka

Tusaalooyinka Adeegyada Soo kabsashada Kala Guurka

- ❖ Taageero lagu codsado u qalmitaanka ee hay'adaha dadka waaweyn, oo ay ku jiraan Qaybta Dhaqancelinta Xirfadaha (DVR), Maamulka Naafonimada dhanka Koritaanka (DDA), iwm.
- ❖ Fulinta dabagalka shaqada sida ku cad Qorshaha Kala guurka IEP.
- ❖ Khibrado shaqaalaysiin ama qaab dhismeed bulsho toos ah oo dheeraad ah.
- ❖ Taageero si loo helo loona diyaariyo Imtixaanka Kuleejka Mareykanka (American College Test, ACT)/Imtixaanka Qiimaynta Aqoonta (Scholastic Assessment Test, SAT) ama imtixaanada kale ee loogu biiro kuleejka.
- ❖ Waxbarasho Si Gaar ah Loo Diyaariyay (Specially Designed Instruction, SDI) ama Adeegyada La Xiriira (Related Services, RS) si ay u taageeraan:
 - Qoritaanka iyo dib u eegista siifiiga.
 - Buuxinta araajida shaqooyinka iyo waxbarashada sii socota.
 - Dejinta iyo dayactirkha miisaaniyadda toddobaadlaha ah.
 - U adeegsiga istiraatiijiyad xiriir shaqaynaya ee dhanka goobaha bulshada.
 - Si madaxbanaan u adeegsiga nidaamka gaadiidka dadweynaha.



Washington Office of Superintendent of
PUBLIC INSTRUCTION

25

Adeegyada soo kabashada Shakhsii ahaaneed waxaa go'aamin doona kooxda IEP waxayna ku saleysnaan doontaa ardayda yoolalka IEP ka hor COVID, iyo qorshaha kala guurka.

Tusaalooyinka qaarkood halkan ayaa lagu soo daray marka tusaale ahaan tani waxay umuuqan kartaa:

- Dabagalka shaqada.
- Taageerada xirfadaha diyaarinta shaqada.
- Taageero lagu dalbado u qalmitaanka shaqaalaysiin la taageerayo iyo in la sameeyo xiriirro kale oo muhiim u ah hay'adda (sida DVR iyo DDA).

Tani waxay sidoo kale u ekaan kartaa taageerada waxbarashada gaarka ah ee himilooyinka IEP sida:

- Sameynta siifiiga.
- Dhamaystirkha codsiyada shaqada iyo waxbarashada.
- Ka shaqaynta xirfadaha maaraynta lacagta.
- Hagaajinta xiriirka wada shaqeynta ee bulshada dhexdeeda.
- Si madaxbanaan u isticmaalida nidaamka gaadiidka dadweynaha.

Kuwani waa tusaalayaal kooban oo ku saabsan sida ay u ekaan karto Adeegyada Soo kabashada Kala guurka. Xusuusnow in kuwani ay ku saleysnaan doonaan IEP-ga ka hor COVID ee ardaydaagd waxaana loo gaar yeelay ardaygaaga.

Sidee Loo Diiwaangeliyaad Adeegyada Soo kabashada Kala guurka?

- ❖ Adeegyada Soo kabashada Kala guurka guud ahaan waxaa lagu diiwaangeliyaad ogeysiis hore oo qoraal ah (Prior Written Notice, PWN) oo la mid ah waxbarashada magdhawga.
- ❖ Adeegyada ka soo kabashada Kala guurka iyo waxa "maalin dugsiyeed" macnaheedu yahay waxay u muuqan karaan kuwo ka duwan ardayda qaadata adeegyada Kala guurka, gaar ahaan kadib da'da 21 jir.
- ❖ Ardayda da'doodu ka weyn tahay 21 jir xaq uma laha inay helaan waxbarasho guud oo bilaash ah oo habboon (FAPE) iyada oo loo marayo IEP. Ardayda aan wali qaadan diblooma, kooxda IEP ayaa laga yaabaa inay go'aamiyaan in adeegyada soo kabashada kala guurka wali loo baahan yahay.
- ❖ Halkii IEP laga siin lahaa warbixinada horumarka, adeegyadan soo kabashada kala guurka iyo waqtiyada ayaa lagu diiwaangelin doonaa iyada oo loo marayo PWN.



Washington Office of Superintendent of
PUBLIC INSTRUCTION

26

Haddaba sidee loo diiwaangeliyaad adeegyadan? Adeegyada soo kabashada kala guurka guud ahaan waxaa lagu diiwaangelinayaad ogeysiis hore oo qoraal ah oo la mid ah waxbarashada magdhawga.

Adeegyada Soo kabashada kala guurka iyo waxa maalin dugsiyeed loola jeedo ayaa sidoo kale u muuqan kara kala duwanaan ardayda heleysa adeegyada kala guurka, gaar ahaan kadib da'da 21aad maaddaama qaar badan oo ka mid ah adeegyadan laga yaabo inay ka dhacaan bulshada dhexdeeda ama goobaha shaqada saacadahana way ka duwanaan karaan maalin dugsiyeedka caadiga ah.

Qodobka muhiimka ah waa in ardayda da'doodu ka weyn tahay 21 sano aysan xaq u laheen waxbarasho bilaash ah oo habboon ama FAPE iyada oo loo marayo IEP. Si kastaba ha noqotee, ardayda ka weyn 21 ee aan weli helin diblooma, kooxda IEP waxay go'aamin karaan in adeegyada soo kabashada kala guurka wali loo baahan yahay.

Halkii ay ku qori lahaayeen IEP warbixinada horumarka, kooxda IEP waxay ku qeexi doonaa adeegyada soo kabashada kala guurka iyo jadwalka waqtiga ogeysiis hore oo qoraal ah. Go'aammadan sidaan horay ugu soo sheegnay soo jeedinta waxay ku saleysnaan doonaa heerka laga filayo horumarka IEP ka hor COVID iyo Qorshaha Kala guurku siduu ahaan lahaa haddii uusan cudurka dilaacin

Marka, marka la soo koobo kooxaha IEP dib uma eegi doonaan IEP ama qiimeyeen kale uma sameyn doonaan ardayda da'doodu ka weyn tahay 21 sano, taageerada ka soo kabashada kala guurka waxay u badan tahay in lagu diiwaangelin doono PWN oo waxay ku saleysnaan doontaa wixii hore ee IEP ka hor COVID.

Sidee Loo Bixiyaa Adeegyada Soo kabashada kala guurka?

- ❖ Kooxaha IEP waxay go'aamiyaan baahida ardayga ee adeegyada ka soo kabashada kala guurka, oo ay ku jiraan jadwalka, jadwalka la filayo, meelaha adeegga, iyo xaddiga adeegyada.
- ❖ Ka fikirida jadwalka & waqtiyada:
 - Go'aannadu waa kuwo shaqsi ahaaneed iyadoo lagu saleynayo heerka waxqabadka ardayga ee hadda marka la barbar dhigo horumarka kala guurka ee la filayo haddii cudurku uusan dilaacin.
 - Waa inuu noqdaa mid loo wada dhan yahay oo la jaanqaadaya ardayga jawigiisa ugu yar ee xaddidan.
 - Waa inay tixgelisaa isku xirnaanta hay'adda, shaqaalaysiinta hadda jirta, iyo/ama helitaanka adeegyada hay'adaha kale ee dadka waaweyn.



Washington Office of Superintendent of
PUBLIC INSTRUCTION

27

Marka sidee loo bixiyaa adeegyada soo kabashada kala guurka?

- Kooxda IEP ayaa go'aamin doonta ardayda u baahan adeegyada soo kabashada oo ay ku jiraan jadwalka, waqtiga, meelaha adeegyada iyo qadarka adeegyada.
- Go'aannadan waa kuwo shaqsi ahaaneed iyadoo lagu saleynayo heerka waxqabadka ardayga ee hadda marka la barbar dhigo horumarka la filayey haddii cudurku uusan dilaacin.
- Adeegyada Soo kabashada waa inay ahaadaan kuwo loo wada dhan yahay inta ugu macquulsan, WAANA
- Inay tixgelisaa isku xirnaanta hay'adda, shaqaalaysiinta hadda jirta, iyo ama helitaanka adeegyada hay'adaha kale ee dadka waaweyn.

Sidee loo Bixiyaa Adeegyada Soo kabashada kala guurka?



Shaqaalaysiin



Ikhtiyaarada waxaa ka mid ah:

- Shaqaalaha waxbarashada gaarka ah ee rukhsad haysta ama shahaado haysta.
- Shaqaalaha degmo dugsiyeedka (oo ay si toos ah kormeer iyo dabagal ugu hayaan shaqaalaha waxbarashada gaarka ah).
- Shaqaalaha waxbarashada gaarka ah ee ka socda degmooyinka iskuulada deriska ah iyo degmooyinka adeega waxbarashada (Educational Service Districts, ESDs).
- Bixinta adeegyo soo kabasho oo leh nasasho gaaban oo waqtio ka dib ah.



Gaadiidka

Kooxaha IEP waa inay la xalliyaa mashaakilka waaxaha gaadiidka ee deegaanka iyo kuwa gobolka si loo hubiyo in ardayda ay leeyihiiin gaadiid ku habboon, haddii loo baahdo inay helaan adeegyada soo kabashada kala guurka.

Ikhtiyaarada waxaa ka mid ah:

- Gaadiidka degmada iyo gobolka.
- Heshiisyada la wadaago.
- Ikhtiyaarada gaadiidka gaarka loo leeyahay.
- Magdhawga waalidka ee kharashka safarka.



Washington Office of Superintendent of
PUBLIC INSTRUCTION

28

OSPI way ogtahay in shaqaalaynta iyo gaadiidka loogu talagalay adeegyada soo kabashada ay noqon doonaan caqabad socota. Kooxaha IEP iyo degmo dugsiyeedyada waxay muudo dheer hirgeliyeen habab kaladuwani oo shaqaalaysiin iyo gaadiidba ah oo loogu talagalay adeegyada kala guurka waxayna sii wadi doonaan hirgalinta kuwan iyo ballaarinta dhaqamada hadda jira. Wuxaad ku arki doontaa wax yar oo halkan ku qoran iyo dukumintigeena hagidda. Si aan waqtiga u ilaalino, maanta si gaar ah uga ma hadli doonno kuwan, laakiin waxaan dooneynnay inaad dhammaantiin isla wada heshaan macluumaaad la mid ah kan degmooyinka.

Maxaan Sameyn Karaa si aan u Taageero Adeegyada Soo kabashada Kala guurka?

- ❖ Ka la xiriir kooxdaada IEP su'aalahaaga ku saabsan adeegyada soo kabashada Kala guurka iyo horumarka ardaygaaga inta lagu jiro cudurka safmarka.
- ❖ Weydii kooxdaada IEP inay ka wada hadlaan horumarka ardaygaaga ee ku saabsan qorshahooda kala guurka ee IEP iyo Qorshaha Dugsiga Sare iyo Wixii Ka Dambeeya, oo ay ku jiraan:
 - Horumarka yoolalka IEP iyo yoolalka dugsiga sare kadib.
 - Dhameystirka Qorshaha Dugsiga Sare iyo Wixii Ka Dambeeya iyo shuruudaha waddada qalinjabinta.
- ❖ La wadaag kooxda IEP aragtidaada ku saabsan waxbarashada dhanka khadka iyo waxa ugu fiican ee u shaqeeeyay ardaygaaga. La xiriir hay'adaha kale ee sidoo kale taageeraya ardaygaaga.
- ❖ Haddii aadan ku raacsanayn qorshaha ikhtiyaarrada soo kabashada kala guurka ee la soo jeediyeey ama jadwalka wakhtiyada, la wadaag walaacyadaada kooxda IEP ee ardaygaaga. Haddii kooxdá IEP aysan heshiis gaari karin, waxaad marin u leedahay xulashooyinka xallinta khilaafaadka.



Washington Office of Superintendent of
PUBLIC INSTRUCTION

29

Maadaama aan bilaabayno inaan soo gabagabeyno dooddeenna fiidkan, waxaan ognahay qoysaska inay la yaaban yihii waxa ay sameyn karaan si ay u hubiyaan in ardaygooda uu helo adeegyada soo kabashada kala guurka ee ay u baahan yihii. Tallaabada ugu horreysa, waxaan kugu dhiirigelinaynaa inaad kala xiriirto kooxdaada IEP su'aalahaaga ku saabsan adeegyada soo kabashada kala guurka iyo, muhiimad ahaan, inaad wax badan ka barato xogta horumarka ardaygaaga inta lagu jiro cudurka safmarka.

Xogta horumarka waxaa ku jiri kara yoolalka IEP, natijjooyinka kaararka warbixinta, horumarka Qorshaha Dugsiga Sare iyo Wixii Ka Dambeeya iyo dariiqooyinka qalinjabinta, horumarka Qorshaha Kalaguurka ee IEP, iwm.

Aqoontaada iyo indha-indheyntaada ku saabsan waxbarashada ardaygaaga inta lagu jiro cudurka safmarka waa mid aad muhiim u ah! Fadlan la wadaag kooxdaada IEP wixii aad ka baratay ardaygaaga intii lagu jiray waxbarashada dhanka khadka, oo ay ku jiraan xeeladaha sida ugu fiican u shaqeeeyay. Haddii ardaygaagu uu xiriir la samaynayo hay'ado kale, sida kuwa shaqada bixiya, fadlan la wadaag maclummaadkaas, sidoo kale.

Waan ognahay xubnaha kooxda IEP in aysan had iyo jeer isku raacsaneyn. Haddii aadan ku raacsanayn qorshaha ikhtiyaarrada adeegyada soo kabashada kala guurka ee la soo jeediyeey ama jadwalka wakhtiyada, la wadaag walaacyadaas kooxda IEP kana codso in la diiwaangaliyo. Waxaad sidoo kale la xiriiri kartaa maamulaha dugsigaaga, agaasimaha waxbarashada gaarka ah

ee degmada, ama xafiiskayaga waxbarashada gaarka ah halkan ee OSPI. Wuxaan macluumaadka xiriirkeena ku haynaa bogagga soo socda.

Ka waran Haddii Ardaygaygu uusan helin Adeegyada inta lagu jiray Cudurka Safmarka?

- ❖ Dugsiyadu waxaa laga yaabaa inay bixiyen waxbarasho gaar ah iyo adeegyo la xiriira, oo ay ku jiraan adeegyo kala guur ah, inta lagu gudajiray cudurka safmarka, qoysaskana waxaa laga yaabaa inay diideen adeegyadaas ama ay doorteen dhanka khadka sababo badan awgood.
- ❖ Waxbarashada magdhowga ah, garsooraha sharciga ee maamulka ama OSPI waxay tixgelin doonaan arrimaha yareynaya ee yareyn kara abaalmarinta magdhawga, sida diidmada adeegyada la bixiyay.
- ❖ Kooxaha IEP waa in ay gaaraan go'aan gaar ahaaneed oo ku kooban ardayga wixii ku saabsan adeegyada soo kabashada kala guurka ee loo baahan yahay iyadoo la tixgelinayo:
 - Helitaanka iyo saamaynta ardayga haddii adeegyada la bixiyo aan la helin.
 - Sababaha qoyska ee diidmada iyo xalka suurtagalka ah ee ardayda si ay u helaan taageero haddii loo baahdo (tusaale ahaan, haddii ardayga aan la heli karin inta lagu jiro bilaha xagaaga).
 - Baahida ardayga iyo saamaynta COVID ee ardayga.



Washington Office of Superintendent of
PUBLIC INSTRUCTION

30

Mid ka mid ah su'aalaha ugu badan ee aan ka heli jirnay labada waalid iyo dugsiyaduba waxay ku saabsan yihiin adeegyada la bixiyo iyo kuwa la helay inta lagu jiray cudurka safmarka. Dugsiyadu waxaa laga yaabaa inay bixiyen waxbarasho gaar ah iyo adeegyo la xiriira, oo ay ku jiraan adeegyada kala guurka, inta lagu guda jiray cudurka safmarka. Qoysaska waxaa laga yaabaa inay diideen adeegyadaas ama ay doorteen waxbarashada dhanka khadka, halkii ay ka noqon lahayd adeegyo la soo xaadirayo, sababo kala duwan awgood.

Waxbarashada magdhowga ah, garsooraha sharciga ee maamulka ama baaraha cabashooyinka OSPI wuxuu tixgalin doonaa arrimo yareynaya abaalmarinta magdhawga, oo ay ku jirto diidmada adeegyada la bixiyay. Nidaamkeenna loogu talagalay adeegyada soo kabashada aaya ah in nidaamkani uu noqdo mid firfircoон oo wadashaqayn leh, halkii aan ka sugi lahayn qoyska inay raacaan xulashooyinka xalinta khilaafaadka. Kooxda IEP waa inay tixgeliyaan awooda ardayga ee helitaanka iyo horumarka adeegyada la bixiyo, sababaha qoyska ee hoos u dhaca qadarka ama nooca adeegyada la bixiyo, iyo baahida shaqsiyeed ee ardayga iyadoo la tixgelinayo cudurka safmarka ee socda. Sidoo kale, waxaas oo dhan markii laga soo tago, qoysaska waxay sii wadayaan helitaanka fursadaha xallinta khilaafaadka.

Sidee OSPI u Taageertaa Adeegyada Soo kabashada Kala guurka?

- Taageerada loo baahan yahay ee loogu talagalay ardayda naafada ah ee ku jira [Qorshaha Soo kabashada Caafimaadka iyo Tacliinta Ardaya ee OSPI: Tilmaamaha Qorsheynta 2021](#).
- Waxaa Daabacay [Washington's Roadmap for Special Education Recovery Services: 2021 & Beyond](#).
- Kulan dhanka khadka oo loo qabtay dugsiyada/iskaashatooyinka degmada ee adeegyada soo kabashada kala guurka ee Maajo 20, 2021.
- Xiriir joogto ah oo lala yeesho iskaashatooyinka kala guurka, oo ay ku jiraan hay'adaha gobolka, dugsiyada, kooxaha bulshada, loo shaqeeuyaasha, iyo bixiyeyaasha horumarinta xirfadeed.
- Hawlaha kormeerka waxbarashada gaarka ah:
 - 2020–21: Waxaa ku jiray dib u eegista Qorshayaasha Kala guurka ee IEP iyo HSBPs, horumarka ardayda, iyo faa'iiddada waxbarasho, iyo sidoo kale bixinta FAPE inta lagu jiro COVID.
 - 2021–22: Waxaa ku jiri doona dib u eegista go'aaminta iyo hirgelinta adeegyada soo kabashada ee loogu talagalay ardayda gaarka ah, iyo sidoo kale Qorshooyinka Kala guurka, HSBPs, horumarka ardayda iyo faa'iiddada waxbarasho.



Washington Office of Superintendent of
PUBLIC INSTRUCTION

31

Waxaa sidoo kale na la weydiiyay waxa OSPI ay qabato si ay u taageerto adeegyada soo kabashada xilliga kala guurka. Dukumiintiyada hagida, oo ay ku jiraan tilmaamaha Qorshaha Soo kabashada Caafimaadka iyo Tacliinta Ardaya iyo khariidadda loogu talagalay adeegyada soo kabashada waxbarashada gaarka ah, waxay siisaa hagitaan gaar ah dugsiyada iyo kooxaha IEP ee adeegyada soo kabashada. Wuxaan kulan dhanka khadka ah u qabanay dugsiyada iyo iskhaashatooyinka degmada ee adeegyada soo kabashada kala guurka ee Maajo 20, wuxaan hadha dib u eegeynaa dukumintigayaga su'aalaha iyo jawaabta ah ee ku saabsan bixinta waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira inta lagu jiro cudurka safmarka.

Waxaan ku howlaneyn xiriir joogta ah oo lala yeesho iskaashatooyinka kala guurka, oo ay ku jiraan hay'adaha iyo golayaasha kale ee gobolka, dugsiyada, ururada bulshada, loo-shaqeeuyaasha, iyo bixiyeyaasha horumarinta xirfadeed.

Waxaan sidoo kale bilownay inaan ku darno adeegyada soo kabashada, oo ay ku jiraan adeegyada soo kabashada kala guurka, kormeerka waxbarashada gaarka ah ee gobolkayaga. Sanad dugsiyeedkaan, howsheena waxaa kamid ahaa dib u eegista qorshooyinka kala guurka IEP iyo qorshooyinka dugsiga sare iyo wixii ka dambeeyaa, horumarka ardayda iyo faa'iiddada waxbarasho ee waqtiga kala duwan, iyo bixinta waxbarashada dadweynaha ee bilaashka ah ee ku haboon (ama FAPE) inta lagu gudajiray COVID. Wuxaan wax ka weydiinay heerka qorsheynta adeegyada soo kabashada ee degmo kasta oo aan kormeer ku sameynay.

Sannadka soo socda, waxaan dib u eegi doonaa go'aaminta, dukumintiyada, iyo hirgelinta adeegyada soo kabashada ee shaqsiyaadka ardayda ah, oo ay ku jiraan qorshooyinka kala guurka, qorshooyinka dugsiga sare iyo wixii ka dambeeyaa, kormeerka horumarka, iyo faa'iidada waxbarasho ee waqtiga kala duwan.

Sideen Wax Badan Uga Baran Karaa Adeegyada Soo Kabashada Kala Guurka?

- Weydiiso kooxdaada IEP macluumaad dheeri ah iyo xogta horumarka himilada IEP si aad ugu wargeliso go'aamada ku saabsan in adeegyada ka soo kabashada kala guurka loo baahan yahay iyo in kale.
- La xiriir xafiiska waxbarashada khaaska ah ee degmadaada haddii aad qabtid su'aalo ama walaac dheeraad ah.
- Tixgeli helitaanka waxbarashada dheeraadka ah ee xagaaga ama sanad dugsiyedka oo ay bixiso degmadu, marka lagu daro wixii adeegyo soo kabasho ah ee loo baahan yahay.
- Booqo bogga qoyska ee Waxbarashada Gaarka ah ee OSPI [Adeegyada Kala Guurka \(Da'da 16-21\)](#) si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan qalinjebinta iyo kala guurka. Wuxuu sidoo kale iimay u diri kartaa [Waxbarashada Gaarka ah](#) ee OSPI ama wac 360-725-6075.
- Kala xiriir Rod Duncan Rod.Duncan@dshs.wa.gov si aad ugala hadasho adeegyada DDA
 - Wax badan ka ogow adeegyada DVR ee [Bogga Kala Guurka Dugsiga Sare](#) ama kala xiriir Tammie Doyle, Maamulaha Kala Guurka ee DVR, halkan [Tammie Doyle's email](#) ama 509-368-1005



Washington Office of Superintendent of
PUBLIC INSTRUCTION

32

Kooxda IEP ee ardaygaaga ayaa ah isha ugu fiican ee laga heli karo macluumaadka ku saabsan horumarka ardaygaaga, adeegyada, iyo baahiyaha adeegyada soo kabashada kala guurka. Wuxuu sidoo kale la xiriiri kartaa agaasimaha waxbarashada gaarka ah ee degmadaada haddii aad qabto su'aalo iyo walaac. Ardaygaagu wuxuu ka faa'iideysan karaa guud ahaan xagaaga ama barnaamijyada dheeriga ah ee sannad dugsiyedka ee ay bixiso degmo dugsiyedkaaga, wixii ka baxsan adeegyada soo kabashada shaqsiyed.

Ugu dambeytiina, waxaan bogga qoyska ee Waxbarashada Gaarka ah ee OSPI ku sii cusbooneysiin doonaa macluumaadka ku saabsan Adeegyada Kala guurka ee ardayda da'doodu tahay 16 illaa 21. Wuxuu sidoo kale iimayl u diri kartaa spced@k12.wa.us haddii aad qabto su'aalaha gaarka u ah ardayda ama waxaad xafiiskeena ka soo wici kartaa 360-725-6075.

Su'aalo?



<https://media.istockphoto.com/photos/red-flag-with-question-mark-on-map-background-3d-rendering-picture-id537276026>



Washington Office of Superintendent of
PUBLIC INSTRUCTION

Su'aalaha Soo Noq-noqda ee Qoysaska

S: Ardaygaygu wuxuu helaa adeegyo kala guur ah wuxuuna 21 jirsaday sannadkan. Ardaygaygu ma awoodi doonaa inuu dugsi dhigto sannad kale?

J: Adeegyada soo kabashada kala guurka aaya loo heli karaa ardayda 21 jirsatay inta lagu jiro sanad dugsiyeedka 2019-20 ama 2020-21 ee aan wali helin diblooma. Kooxda IEP waa inay si wada jir ah u shaqeeyaan si loo go'aamiyo waxa looga baahan yahay adeegyada soo kabashada kala guurka. Qaddarka iyo nooca adeegyada sookabashada kala guurka ee ardayga waa go'aanno shaqsiyeed oo ay gaareen kooxda IEP iyadoo lagu saleynayo farqiga u dhexeeyaa horumarka u dhexeeyaa IEP ka hor COVID iyo Qorshooyinka Kala guurka iyo horumarka hadda jira.

S: Ardaygaygu wuxuu qalin jabinaya Juun 2020. Ardaygu miyuu awoodi doonaa inuu helo adeegyada soo kabashada?

J: Hadii ardaygu helo diblooma bisha Juun 2020, ardaygu xaq uma laha adeegyo ama taageero ka timaadda degmada dugsiga dadweynaha. Kasbashada diblooma waxay dhammeyneysaa u qalmitaanka iyo xaq u lahaanshaha waxbarasho guud oo bilaash ah oo habboon (FAPE). Tani waa sababta oo ah kooxda IEP aaya mas'uul ka ah go'aaminta marka ardaygu buuxiyo shuruudaha qalin jabintooda oo aysan ku koobnayn kaliya dhibcaha iyo dariqa qalinjabinta laakiin sidoo kale qorshahooda kala guurka ee IEP iyo yoolalka IEP. Marka ardaygu kasbado dibloomahooda, sababtoo ah kooxda IEP waxay go'aamiyeen inay buuxiyeen dhammaan shuruudaha qalinjabinta iyo inaan loo baahnayn adeegyo waxbarasho gaar ah oo dheeri ah, oo ay ku jiraan adeegyada soo kabashada kala guurka. Haddii waalid ama arday qaangaar ah uu dareemo arday qaataay diblooma in loo diiday FAPE, waxay raaci karaan [ikhiyaaraadka xallinta khilaafadka](#).

Su'aalaha Soo Noq-noqda ee Qoysaska

S: Ka waran haddii ardaygaygu awoodi kari waayey inuu helo adeegyo inta lagu jiro cudurka safmarka? Ka waran haddii ardaygaygu dib u dhaco inta lagu jiray cudurka safmarka?

J: Helitaanka iyo ka qaybgalka waxbarista, horumarka iyo dib u dhaca, adeegyada la seegay, iwm. dhammaantood waa macluumaad ay tahay in kooxda IEP ee ardayga ay tixgeliyaan oo ay ka wada hadlaan markay go'aaminayaan in adeegyada soo kabashada ay lama horaan yihiin iyo waxa adeegyadaas soo kabashada ay diiradda saari doonaan.

S: Haddii arday 21 jir yahay ama ka weyn yahay, oo uu helayo adeegyada soo kabashada kala guurka, ardaygu ma helayaa IEP? Xagee lagu diiwaangelinayaad adeegyada soo kabashada?

J: Ardayda da'doodu ka weyn tahay 21 sano ma heli doonaan IEP, laakiin haddii kooxda IEP ay go'aamiso inay u baahan yihiin adeegyo soo kabasho kala guur waxaa lagu diiwaangelin doonaa Ogeysiis hore oo Qoraal ah (PWN).

Waad ku
mahadsantahay
dadaalkaaga joogtada ah
ee aad ku taageerto
ardaydaada adoo u
maraya durufo aan la
hubin oo dhaqso isku
badalaya iyo
iskaashigaaga socda ee
dugsiyada iyo
iskaashatooyinka
waxbarashada!



Washington Office of Superintendent of
PUBLIC INSTRUCTION

36

Tania